## Su´aalo iyo jawaabo

**Waa maxay maro?**
• Dharka maryaha laga sameeyay: waa xaafayadaha, fanaanadaha, shaatiyaasha, surwaalada, dharka hoos laga xirto iyo sigisyaanta (iskaalshooyin).
• Alaabta guriga ee maryaha laga sameeyay: dharka sariiraha, shukumaanada (tuwaalada), maryaha miisaska lagu goglo, daahyada, bustayaasha iyo roogagga.
• Boorsooyinka maryaha laga sameeyay: boorsada (shandada) gacanta, kiishashka maryaha laga sameeyay, boorsooyinka lagu qaato alaabta is qurxinta iyo galalka.
• Waxyaalaha maryaha laga sameeyay: neegatiinada, caanshiyaha sanka, koofiyadaha iyo koofiyadaha horay u dheer.

**Maxaan maryaha halkaan u dhigayaa?**
Laga bilaabo 1 jeenawari 2025 waa in dharka gaar loo sooco oo meel gaar ah lagu ururiyo. Qasaaladaadu waxay ku jirtaa TIJAABO qaybta maaraynta qashinka ee Svenljunga ay maamusho. Waxaan tijaabinaynaa haddii ay suurtagal tahay in maryaha qaabkaas lagu soo ururiyo.

**Muddo intee le´eg ayay soocon doontaa tijaabadu?**
Tijaabadu waxay socon doontaa hal sano, laga bilaabo meey 2025 illaa iyo meey 2026.Tijaabada waa la joojin doonaa haddii si khaldan loo sameeyo, tusaale ahaan haddii la isku dhex qaso ama maryaha la dhigo bannaanka haanta.

**Maxaa tijaabada loo samaynayaa?**
Maryaha markii qashinka lagu daro waa la gubaa. Haddii maryaha gaar loo sooco dib ayaan u isticmaali karnaa ama wax cusub looga samayn karaa oo sidaas lagu kaydin karaa khayraadka adduunka. Ma ogtahay in loo baahan yahay 9 kg oo qashin ah si loo sameeyo fanaanad T-shirt ah?
Hadafka laga leeyahay tijaabada waa inaan joojino inaan maryaha qashinka ku tuurno oo taas cagqsigeeda aan ku tuurno meel gaar ah oo lagu ururiyo.

**Ma keligeen baa samayn doonna tijaabada ururinta?**
Maya, waxaa jira dhowr degmooyin oo tijaabooyin kala duwan ku samaynaya sida maryaha loo soo ururin karo. Tijaabadaan waxaan kala shaqaynanaa degmooyin kale iyo shirkado Iswiidhan iyo Denmark ka jira. Waa mashruuc wax loogu yeero Interreg oo maalgelintiisa ka qayb qaadanayo Midowga Yurub.

**Haddii aan su´aalo ka qabo tijaabada iyo ururinta, yaan weydiinayaa?**
Waxaa tijaabada fulinaya qaybta maaraynta qashinka ee degmada Svenljunga iyagoo la kaashanaya u qaabilsanaha istiraatijadda bey´adda ee degmada , Therese Silow. Kala xiriir Teherese therese.silow@svenljunga.se

**Maxaa lagu samaynayaa maryaha halkaan lagu ururinayo?**
Maryaha halkaan lagu ururinayo waxaa loo dirayaa Wargön Innovation, oo ku taal bannaanka Trollhättan, si tirakoob loogu sameeyo oo loo barbardhigo tijaabooyinka kale ee Iswiidhan laga fulinayo.

Maryaha hadhow waa la kala sooci doonaa si dib loogu isticmaalo ama dib loogu warshadeeyo sida ugu fiican.

**Ma khasab baa inaan halkaan keeno maryaha?**
Maya, waxaad dooran kartaa meelo kale inaad gaysid maryaha aadan u baahnayn. Waa kuwaan dhowr goobood oo kale oo degmada ku yaal oo qaabila maryaha:

- Dukaamada alaabta gacan labaadka ah (wixii dhamaystiran oo nadiif ah keliya)
- Mogareturen
- Xarumaha alaabaha dib loogu warshadeeyo

**Maryaha qashinka kale ma ku dhex tuuri karaa?**
Maya, dhammaan maryaha waa la ururinayaa.

**Maxaa laga wadaa in maryaha dib loo isticmaalo?**
In dib loo isticmaalo maryaha waxay la micne tahay in marada mar kale la isticmaalayo.

**Maxaa laga wadaa in maryaha dib loo warshadeeyo?**
In dib loo warshadeeyo waxay la micne tahay in marada la burburinayo oo xarko yaryar laga dhigayo oo shay cusub laga samaynayo.